



# War Murtiyeedka SHIRWEYNAHA 6<sup>AAD</sup> EE XEER ILAALIYEYAASHA SOOMAALIYEED

## Commuque

KA HORTAGA IYO LA DAGAALLANKA  
**DANBIYADA ABAABULAN**

“The Role of the AGO to Prevent and  
Fight Organised Crimes”



Jazeera Hotel  
Mogadishu, Somalia



14-15 Feb, 2024

Shirwaynaha 6<sup>aad</sup> ee Xeer Ilaaaliyeasha Soomaaliyeed oo sannadkan hal-ku-dhaggiisu yahay: “ka hortagga iyo La dagaallanka Danbiyadda Abaabulan” ayaa lagu qabtay Hotel Jaziira ee magaalada Muqdisho Soomaaliya. Shirka oo lagu qabtay Hotel Jazeera wuxuu socday muddo 2 maalmood ah 14-15 ka Feb 2024.

Shirka waxaa ka soo qeyb galay madax ka kala socotay Xafiiska Xeer Ilaaaliyaha Guud ee Qaranka iyo Xafiisyada Xeer Ilaaalineed ee Dawladaha Xubnaha ka ah Federaalka, Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed, Ciidanka Boliska Soomaaliyeed, Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha, Maxkamadda Sare ee Dalka, Wasaarada Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka, Maxkamadda Racfaanka Gobolka Banaadir iyo Gobolka Benaadir, xubno ka mida Golaha Shacabka, Machadka Tababarka Garsoorka, Bangiga Dhexe, Hay'adda Warbixinada Maaliyadda , Ururka Qareennada Soomaaliyeed, Culumada Soomaaliyeed, Ururada Bulshada Rayidka ah, Hay'addaha IDLO, EUCAP, UNSOM, SWDC iyo Marti Sharaf kale. Shirka waxaa si rasmi ah u furay Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Shirka waxaa looga dooday Cilimi baaris ay ka mid tahay:

1. Ka hortagga iyo la-dagaalanka maalgalinta argagixisada,
2. Xakameynta iyo ka Hortagga ka Ganacsiga Hubka Sharci daradda ah.
3. Kaalinta XXIG ee La dagaallanka Dambiyada Musuqmaasuqa Maamul iyo Maaliyadeed.
4. Ka hortagga iyo La Dagaalanka Danbiyada Socdaalka iyo ka Ganacsiga Dadka.
5. Ka hortagga iyo La dagaalanka ka ganacsiga Maandooriyaha.

**War-Murtiyeedka ka soo baxay Shirweynaha 6aad ee Xeer-Ilaaliyeyaasha soomaaliyeed**

**Qodobadda warmurtiyeedka kasoo baxay Shirweynaha 6aad ee Xeer-Ilaaliyeyaasha soomaaliyeed**

1. Ka qeyb galayaasha Shirku waxa ay u mahad celinayaan qaban qaabiyayaasha shirka iyo Hay'adaha ka qeyb qaatay taaba galidda shirkaan oo socday mudo laba maalmood ah.
2. Shirku waxa uu bogaadinayaan boorinayaana in kor loo qaado wacyigalin busho oo la xiriirta saamaynta taban ee uu bulshada ku leeyahay danbiyada abaabulan sida Maalgalinta Argagixisadda, Maandooriyaha, musuqmaasuqa,Ka ganacsiga Dadka iyo ka ganacsiga hubka sharci daradda ah.
3. Shirku wuxuu taageerayaa Dadaalka Xukuumadda iyo Baaqii Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee ahaa ladagaalanka Maalgelinta Argigixsada, wuxuuna boorrinyaa in la sii xoojiyo hawlahaas.
4. Shirka waxaa uu soo jeedinayaan in la is waafajiyo dhammaan Xeerarka Dalka ee saameynta ku leh danbiyada abaabulan.
5. Shirku wuxuu hoosta ka xarriiqay dhibaatooyinka maandooriyaha ay ku hayaan bulshada Soomaaliyeed, wuxuuna soo jeedinayaan in Hay'adaha amniga iyo Xeer Ilaalintu sare u qaadaan dadaalka ka dhanka ah.
6. Waxaa kale oo uu shirku bogaadinayaan wada shaqeynta joogtada ah iyo xiriirkadag ee ka dhexeeya Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka iyo Hay'adaha Baarista dalka, waxa uuna ku boorinayaan in la joogteeyo ku kormeerridda la dagaalanka danbiyadda abaabulan.
7. Ka qeyb galayaasha Shirku waxa ay adkaynayaan baahida loo qabo in la tayeeyo hay'adahabaarista oo hawbawlo u ah La dagaalanka danbiyadda abaabulan.
8. Ka qeyb galayaasha shirku waxa ay hoosta ka xarriiqeen muhiimadda ay leedahay in la helo Xabsiyo lagu hayo dadka danbiyadda gala.
9. Shirku waxa uu ka walaacsanyahay miisaaniyad yaridda Hey'adaha Garsoorka dalka gaar ahaan Xafiisyada Xeer Ilaalinta Soomaaliyeed heer Federaal iyo heer Dowlad Goboleed, waxa uuna ku talinayaan in hay'adda fulinta ee heer Federaal

iyo heer dowlad Goboleed ay xil iska saaraan wax ka qabashada Arrintaas.

10. Gunnaanad, Shirku wuxuu aqoonsaday doorka Xafiiska Xeer Ilaalinta heer Federal iyo heer Dowlad Goboleed ku leeyihiin dowlad dhiska Soomaaliya, iyo sida ay lagama maarmaan u tahay in la helo Xeer Ilaaliyeyaa ku qalabeysan aqoon, daacadnimo, karti iyo hufnaan.

Dhammaad.

Allaa Mahad leh

Khamiis, 15ka Febraayo, 2024.

